

# Kiridhitka Minnesota ee loogu talagalay cashuur bixiyayaasha carruurta leh: Caawinta qoysaska iyo carruurta!



TKiridhitka Canshuurta Ilmaha waxay siisaa cashuur dhimis shakhsiyadka carruurta leh. Kiridhitku waxay kaa dhimi kartaa canshuurta lagugu leeyahay waxayna ku siin kartaa canshuur celin.

## Miyaan u qalmaa Kiridhitka Cashuurta Ilmaha?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Kiridhitka Cashuurta La siiyo dadka dhalay Ilmaha.

- Waxaad ku noolayd Minnesota sanadka oo dhan ama qayb ka mid ah sanadkii 2023, iyada oo laga dhafo xubnaha milatariga.
- Inaadan ahayn qof ku tiirsan cid kale.
- Inaad leedahay hal ama in ka badan “carruur u qalma” sida ay qeexday IRS.

## Waa imisa?

Kiridhitka ugu badan waa \$1,750 ilmo kasta oo kayar 18 jir, iyada oo aysan saarnayn wax xadidaad ah tirada carruurta. Kiridhitka ayaa si tartiib tartiib ah u yaraanaya haddii dakhligaagu ka badan yahay \$35,000 kuwa si wadajir ah u xareynaya, ama in ka badan \$29,500 dadka sida shaqsiga u xaraysta. Waxaa hoos loo dhigayaa 12% lacagta aad sameyso ama wadarta dakhliga aad haysato ka dib marka wax kasta laga jaro, hadba midkii badan.

## Sideen u sheegan karaa?

Codso Kiridhitka Canshuurta Ilmaha adoo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, Kiridhitka Ilmaha iyo Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska ee Minnesota.

Waxa kale oo aad u qalmi kartaa diyaarinta cashuur celinta bilaashka ah! Tag [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) gali **free tax preparation** (diyaarinta canshuurta bilaashka ah) sanduuqa wax laga raadiyo si aad u heshid adeegyada diyaarinta canshuurta bilaashka ah ee kuu dhaw.

# Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyska ee ku nool Minnesota: Ayaa kuu shaqaynaya!



**Kiridhitka Xubin Qoyska u shaqeeya waxay cashuur dhaaf siiyaan shakhsiyadka dakhligoodu ka hooseeyo heer cayiman. Kiridhitku waxay kaa dhimi kartaa canshuurta lagugu leeyahay waxayna ku siin kartaa canshuur celin.**

## Miyaan u qalmaa Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyska?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyska.

- Wuxaan ku noolayd Minnesota sanadka oo dhan ama qayb ka mid ah sanadkii 2023, iyada oo laga dhaafo xubnaha milatariga.
- Inaadan ahayn qof ku tiirsan cid kale.
- Haddii aad xaas tahay oo adiga ama saygaaga/xaaskaaga aad tiihiin shisheeye aan deganayn, xaaladdaada xerayntu waa inay noqotaa mid aad wadajir u xaraysataan
- Haddii aadan lahayn carruur u qalanta, adiga iyo xaaskaaga/saygaaga waa inaad degganaydeen Mareykanka in ka badan kala bar 2023.

## Waa imisa?

Haddii dakhligaagu yahay \$8,750 ama ka badan, kiridhitka ugu badan waxay ku xidhan tahay tirada carruurtaada u qalma ee da'doodu tahay 18 ama wixii ka weyn:

- \$350 marka uusan jirin ilmo kugu tiirsan
- \$1,275 marka uu jiro hal ilmo oo kugu tiirsan
- \$2,450 marka ay jiraan laba ilmo oo kugu tiirsan
- \$2,850 marka ay jiraan saddex ilmo ama wax ka badan oo kugu tiirsan

## Sideen u sheegan karaa?

Codso Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska adoo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, Kiridhitka Ilmaha iyo Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska ee Minnesota.